

# Tallaabo la filan karo oo lagu dhimayo xasaradaha ay abaaruhu keeneen: Qiimaynta saamaynta abaarta iyo jawaabaha gargaarka ee Kenya iyo Soomaaliya, 2020-2022[1]

## *Soo koobid*

Toban sano ayaa laga joogaa warbixintii 2012 ee dib u dhigista khatarta ah ee lagu falanqeeyey saamaynta gargaarkii habsanka ahaa ee abaartii Geeska Afrika ee 2011, malaayiin qof oo ku nool Geeska Afrika ayaa mar kale wajahay gaajo iyo macaluul.

Bulshooyinka ku dhaqan dhulka oomanaha (semi-arid lands, ASAL) ee Kenya iyo Soomaaliya ayaa wajahaya abaaro ba' an kadib saddex xilli roobaad oo xidhiidh ah oo roobka la helay uu aad u hooseeyay. Khubarada ayaa isku raacay in, si ka duwan gurmadka abaartii 2017, nidaamka gargaarku inta badan wuu ku guul darreystay inuu hore si waafi ah wax uga qabto si looga hortago dhibaatooyinka hadda jira.

Warbixintani waxa ay soo koobaysaa duruus iyo aragtiyo laga soo qaatay daraasad ay samaysay Xarunta Isbedelka arimaha Bini'aadantinimo ee ku saabsan tilaabooyinka la filayo (TL) si loo yareeyo saamaynta abaarta ee Kenya iyo Soomaaliya.

Waxay diiradda saaraysaa TL[2], iyada oo la eegayo sida daneeyayashu u isticmaaleen saadaasha cimilada iyo qiimaynta xaaladaha sugnaanta cuntada si looga hortago ama loo yareeyo saameynta xun ee abaartu ku leedahay nolosha dadka. Waxay soo bandhigaysaa caqabadaha iyo awood-galiyayaasha TL waxayna ku talinaysaa habab si wanaagsan loogu taageero ficilkan oo kale mustaqbalka. Waxayna sidoo kale u tahay warqad tixraac/aasaas ah oo loogu talagalay warbixinta hadda ee 'daahitaanka kahatarka'.



[1] Qoraalkan kooban waxa uu soo koobayaa warbixin ay diyaarisay Xarunta Isbadalka Bini'aadantinimada ee Jameel Observatory for Security Action Early Action iyo la-hawlgalayaasheeda Save the Children UK iyo Jaamacadda Edinburgh Global Academy ee Beeraha iyo Nidaamyada Cuntada. Xuquuqda sawirka: Joyce Maxwell/CHC. Waxa turjumay Som Turjumaan.

[2] tillaabada filashadu waa tallaabo tallaabo ah "oo horay loo qaaday qalalaasaha, ka hor ama naxdinta ama saameynteeda ugu sarreysa."

## Nuxurka gabogabada

### Odoroska hore ee digniinta iyo saadaashau way soo hagaagtaay waxaana loo arkaa mid la aamini karo

Daneeyayaasha ayaa  sheegay in tiro badan oo xog ah oo loogu talagalay saadaalinta iyo odorosku la ururiyay, la taxliiliyey loona adeegsaday ujeeddooyin la xidhiidha digniinta aafooyinka. Tan si istaraysa loo falanqeeyay iyadoo la adeegsanayo qaab-dhismeedka falanqaynta guud. Falanqaynta waa mid la isku halayn karo, si wanaagsan loo fahmayo loona adeegsaday go'aan gaadhista, gaar ahaan inta lagu guda jiro xayndaabka bani'aadamnimada. Falanqaynta iyo go'aan qaadashada la xidhiidha ayaa si tartiib tartiib ah u yeelatay una hogaaminayey dawladaha, waxaana jira caddaymo la xidhiidha ka qaybgalka ururada aan dawliga ahayn iyo bulshada maxalliga ah iyo go'aanno loo dhan yahay ee labada waddan.

Madalaha saadaasha iyo odorosku waxa ay isticmaalayaan tignoolajiyad islamarkaan horumariyeen farsamadooda si ay kor ugu qaadaan kalsoonida lagu qabo falanqayntooda. Helitaanka xogta iyo falanqaynta ee sii kordheysa ayaa u oggolaanaysa awood weyn oo lagu sameeyo kala jajabin laguna bixiyo sawirro aad u qoto dheer oo ku saabsan saameynta dhici karta jahawareerka cimilada ku leedahay hab-nololeedyada.

Nidaamyada digniinta ka hortaga ee aan rasmiga ahayn ee heer deegaan iyo macluumaadka tooska ah ayaa si fiican uga shaqeeya meelo badan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira kala go' joogto ah oo u dhexeeya

nidaamyadan iyo nidaamyada si rasmi ah loo aqoonsan yahay. In kasta oo ay jiraan dadaallo wanaagsan oo ay sameeyeen hay'adaha digniinta hordhaca ahi iyo cimiladu, xidhiidhka laba-geesoodka ah ee macluumaadka u dhexeeya bulshooyinka iyo nidaamyada tooska ah ee digniinta hordhaca ahi wali waa caqabad.

### In kasta oo ay jirto falanqayn lagu kalsoon yahay, wakhtiga lagu kicinayo ficilka la filayo

waxa ka buuxa dhibaatooyin labada dalba, xilliyo cimileedku ( Gu, jiilaal,xagaa & dayr) waa shay aasaasi u ah hab-nololeed kasta waxayna si xooggan u saameeyaan quudka, nafaqeynta, iyo natiijooyinka caafimaadka bulshada, oo ay ku jirto khatarta macaluusha. Dib-u-eegiddu waxay soo jeedinaysaa in TL laga hirgaliyo Soomaaliya si degdeg ah ugu horayn Ogosto/Sebtembar 2020 markii la saadaaliyay laba xilli roobaad oo isku xigta oo ka hooseeya celceliska, taas oo lagu xoojiyay digniinta FEWS NET ee Ogosto 2020. Laga bilaabo qodobkan iyo ilaa wax yar ka dib roobabkii March-May 2021 waxaa jiray saadaalino badan oo is xoojinaya, digniino iyo odorosyo oo sii kordhiyey kalsoonida qaadashada habka "aan laga shallayn" si loo hirgaliyo TL. Dhanka Kenya, taariikhda ugu macquulsan ee TL waxay u badan tahay Janaayo/Febraayo 2021.

### Caqabadaha wali waxa loo rogayaa oo loo isticmaalayaa abla-ablaynta digniinta ka hortaga degdega ah si dardargaliyo ficilada la filayo

Galdaloolooyinka digniinta hordhaca ah-Ficilka hore (Early warning-early action, EW-EA) ayaa weli ah caqabad weyn. Tani waxay la xidhiidhaa arrimaha hababka waxqabadka degdega ah iyo sidoo kale siyaabaha ay u shaqeeyaan hababka digniinta ee hore. Waxaa jira hubanti la'aan ka jirta dardargalinta ficilka la filayo ee meelaha adag ee jahawareerka cimiladu ka yahay hal caqabad sida nidaamyada hab-nololeedku ay ula qabsanayaan oo ay isu beddelayaan.

Waqtigan xaadirka ah, nidaamyada digniinta ee hore waxay u muuqdaan inay isticmalayaan aragtida toosan ee abaarta inay tahay dhacdo leh saddex marxaladood - ka hor, inta lagu jiro iyo ka dib, taasoo keenaysa qaab joogto ah iyo noocyada jawaabaha ee horumarinaya TL ilaa jawaabta hore, si hore waxa looga qabta horena looga soo kabto. Dadka sida tooska ah ula kulma masiibooyinka, la tacaalida abaartu uma aha dhacdo bilaabma oo dhammaata. Gurmadka maxalliga ah ee abaarta hadda jirtaa waxa ay ku xidhan tahay taariikhda gurmadyadoodii hore ee ay ka bixiyeen aafooyinkii hore waxayna qayb weyn ka qaadan doontaa sida ay ula tacaali doonaan aafooyinka mustaqbalka. Daraasadani waxay ogaatay in farqiga EW-EA uu aad hoos ugu dhacay heerka maxalliga ah, iyada oo caqabadaha ugu waaweyni ay yihiin awoodda iyo agabka. Nadaamka rasmiga ah waxa uu bilaabay in lagu dabaqo hababka nidaamka TL oo dhan, guud ahaan xidhiidka arimaha bini'aadantinimada – Barnaamujyada horumarka laakiin dadka la waraystay waxay bixin karaan wax yar oo caddayn ah aragtida TL, ugana sii daraysa galdaloolooyinka EW-TL.

Nidaamyada digniinta hordhaca ee hadda jiraa waxay u muuqdaan inay xoogga saaraan saamaynta jahawareerka cimilada ee dadka reer miyiga ah iyo halbeegyada haqab-beelka cuntada sida suuqyada, wax-soo-saarka, helidda

cunnada iyo quudashada cunnada. Haddaba, arrimaha aadka u adag ee shabakadaha bulshada, arrimaha qoyska dhexdiisa, caafimaadka, nafaqada, nadaafadda, biyaha, dadka magaalooyinka ku nool, lab iyo dhedig iyo ka qaybgalinta cid kasta ayaa u muuqda inay hoos u dhacayaan. Go'aan-gaadhayaasha way ku adkaatay inay saadaaliyaan saamaynta masiibooyinka ee kakan, taa beddelkeeda waxay diiradda saaraan waxqabadyada haqab-beelka cuntada.

Hubanti la'aanta ku saabsan hirgalinta falanqaynta digniinta hordhaca waxay sidoo kale dib u dhigtaa ficilka. Xog dheeraad ah, falanqayn aad u casrisan iyo qaab dhismeedyo badan oo sharaxaad ah ayaa kordhiya fahamka isbedbedelka xasaradaha laakiin sidoo kale waxay kordhiyaan farqiga u dhexeeya falanqaynta iyo awoodaha go'aan-gaadhayaashu ay ku qaataan go'aamo habboon. Xogo badan iyo falanqaynaha ayaa sidoo kale kordhiya suurtagalnimada kala duwanaanshaha saadaalaha iyo odorosyada, sida la sheegay waxay keentay faham yaraan, kalsooni iyo adeegsiga falanqaynta.

Cusbooneysiinta joogtada ah ayaa loo arkaa hubanti-la' aan sii kordheysa iyo mid sii yaraaneysa labadaba. Dhinac, kakanaanta iyo isbedbedelka macnaha guud ayaa dalbanaya cusbooneysiin joogto ah, dhanka kalena diirad saarista isbedelada wakhtiga gaaban waxay jahawareerin kartaa go'aan qaadashada wakhtiga dheer.

### Waxaa jira awoodo iyo agabyo loogu talagalay TL ee nidaamyada maxaliga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn, laakiin galdaloolada ku jira hawlgelinta fikirka guud ee nidaamka ayaa weli

ah ku wajahan meelaha ay fuliyayaasha TL si dhow ula shaqeeyaan bulshooyinka maxalliga ah ayaa la muujiyey inay yihiin qalab wax ka qabashada cunto yarida, leedidda xoolaha, iyo saamaynaha xun-xun ee kale ee hab-nololeedyada. Xaaladaha sii xumaanaya ayaa hore loo soo qaaday waxayna saameyn ku yeesheen go'aan gaarista shabakadaha bulshada, dawladda hoose iyo hay'adaha aan dawliga ahayn. Inta badan jawaab bixiyaasha Soomaaliya ayaa sheegay in nidaamyada ku saleysan bulshadu ay yihiin kuwa ugu dhaqsaha badan ee wax looga qabanayo dhibaatooyinka. Shabakadaha bulshada ee aan rasmiga ahayn iyo nidaamyada heer deegaan ayaa sii ahaanaya kuwa ugu horreeya ee wax ka qabta waxayna yihiin qaar ka mid ah tusaalooyinka dhawrka ah ee ficil dhab ah oo la filayo. Hababka la qabsiga aan rasmiga ahayn ayaa door muhiim ah ka ciyaaray yaraynta caqabadaha soo wajaha qoysaska Soomaaliya. Ururada aan dawliga ahayn ee maxaliga ah iyo dawlada hoose ayaa kaalin mug leh ka qaatay gurmadka abaaraha ee ka jira labada dal. In kasta oo ay jiraan tusaalayaal istraatijiyado ah oo lagu xidhiidhinayo hababka ay bulshada iyo shabakadaha bulshadu hoggaamiso ee lagu abaabulo haynta iyo qaadista tallaabooyin horudhac ah oo leh hababka jawaabta rasmiga ah, waxa jirta caddayn kooban oo tan ku saabsan ficil ahaan.

### Maalgelinta muga yar ee saadaalinta ku salaysan ayaa muujisay saamayn laakiin si ballaaran looma helayo

Caddaynta ayaa muujinaysa in waxqabadyada hore ee la adeegsanayo maalgelinta ku salaysan saadaasha ay dib u soo celin weyn oo degdeg ah ku leeyihiin maalgashiga. Daraasado dhowr ah ayaa xaqiijiyay qiimaha dardargalinta ee maalgelinta ku salaysan ay ku saabsan tahay saadaal hore ee xaaladaha musiibada si loo taageero ficil ka hor qalalaasaha. Si kastaba ha ahaatee, gobolkan, isha ugu badan ee maalgelinta TL ee ka jawaabista digniinta hordhaca ahi waa tabaruca xubnaha bulshada. Marka la eegayo waraysiyada la qaaday, daneeyayaasha kale (dawladda iyo NGO-yada) midkoodna awood uma helin lacago loogu talagalay TL, ama dhaqaalihii ay hayeen si

**Gabagabada muhiimka ah**:

1. Saadaasha digniinta degdega ah iyo odoroska ayaa soo hagaagay waxaana loo arkaa mid lagu qanci karo
2. Marka laga tago falanqaynta lagu kalsoonaan karo, wakhtiga lagu dardargalinayo ficilka la filayo waxaa hortaagan caqabado.
3. Caqabadaha wali waa in la sharaxo oo la isticmaalo falanqaynta digniinta degdega ah si loo dardargaliyo ficil la filayo
4. Waxaa jira awoodaha iyo agabka TL ee nidaamyada maxaliga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn
5. Maalgelinta kooban ee saadaalinta ku salaysan ayaa muujisay saamayn laakiin si ballaadhan looma heli karo
6. Tallaabooyinka ay qaadeen inta badan dadka ay khusayso ayaa ka habboonaa in la yareeyo saamaynta abaarta halkii la ilaalin lahaa hab-nololeedyada iyo xoojinta nidaamyada.

degdeg ah ayaa loo isticmaalay. Fuliyayaasha gurmadku waxay ka cawdeen inay jirto dabacsanaan xadidan oo ku saabsan dib u qorshaynta deeqaha. In kasta oo deeq-bixiyeyaasha, Qaramada midoobay, iyo NGO-yadu ay u muuqdaan kuwo doonaya inay u weeciyaan maalgelinta jirta labada waddan, nidaamka xafiisyada dawliga ah ee murugsan ee ku xeeran arrintan ayaa weli ah mid aad u culus.

Waxaa jira tusaalooyin badan oo ah kheyraadka horay loo sii dejiyay ee abaarta, oo ay ku jiraan lacagaha degdega ah iyo kuwa wax ka beddela xasaradaha, laakiin inta badan, waxa kiciya sii dayntu waa xaalad degdeg ah, kuma salaysna saadaasha. Tijaabada TL oo ay maalgaliyeen Sanduuqa Waxqabadka Degdegga ah ee Dhexe iyo Bangiga Adduunka ee Soomaaliya waxa uu bixiyaa barasho muhiim ah oo ku saabsan horumarinta nidaamyada TL, gaar ahaan in lagu heshiiyo waxa maalgelinta la rabo in lagu qabto iyo sida loo qeexayo ficil u gaar ah oo ku habboon xaaladda maxaliga ah.

### Tallaabooyinka ay qaadeen inta badan dadka ay khusayso ayaa ahaa kuwa aad ugu habboon in la yareeyo saamaynta abaarta halkii la ilaalin lahaa hab-nololeedyada iyo xoojinta nidaamyada

In kasta qiimaha saadaasha la muujiyey si loo saadaaliyo khatarta sii kordheysa ee dhibaatooyinka haqab-beelka cuntada iyo faa'iidooyinka cad ee TL iyo go'aan gaadhista dardargaliyayaashu ay weli ku xidhan tahay wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah; haddana TL wali waa fikrad cusub, dad badan oo ay khusaysona way ku raaxaysteen inay ka hadlaan hababka waxqabadka hore ama u diyaarsanaanta marka loo eego saadaasha ku salaysan ama fal la filayo. Soomaaliya gudaheeda, qorshaha ugu muhiimsan ee dowladda iyo nidaamka bini'aadantinimo ee wax qabadku waa mid aad looga naxo wuxuuna falceliya marka ay dhibaato soo baxdo

maalgelin ayaa la heli karaa. Waxaa jira cadaymo muujinaya in moodooyinka TL laga soo saarayo lagana machadeeyay labada waddan, laakiin khibradda duuliyayaasha moodooyinkan ayaa la isku daray 2020-22.

Nidaamyada jira ee EW-EA ayaa aad ugu janjeedha isku dubaridka jawaabta degdegga ah. Daneeyayaasha ayaa soo sheegay in hababka TL ee hay'adaha kala duwani ay ku shaqeeyaan kali kali oo ay jirto baahi loo qabo iswaafajin iyo isku dubarid weyn. Barnaamijka Gurmadka Abaaraha ee Kenya ka socda ayaa waxaa ku jira qaab-dhismeedyo lagu suurtagelinayo wax ka qabashada abaarta hore. Si kastaba ha ahaatee, xitaa tani wali waa fal-celin oo wali ma aysan bilaabin inay wax ka qabato nidaamyada hore iyo ficilka ee ay ku jirto TL. Iyadoo ay jiraan caqabadahaas, waa mid ka mid ah tusaalooyinka dhowrka ah ee habka hababka si loo suurtageliyo ficilka lagu yareynayo saameynta isbdelka cimilada ee la saadaalin karo. Soomaaliya, dhismeyaasha hab-nidaamyadu si tartiib-tartiib ah ayaa loo dhisayaa oo la isu keenayaa, laakiin inta badan tallaabooyinka la filayo waxay ka dhacaan nidaamka aan rasmiga ahayn.

Wakiilada bulshada deegaanka ee Kenya waxay dareemeen ka jawaab celinta abaarta hadda jirta inay ka waxtar yar tahay sidii hore, taasoo ay ugu wacan tahay dhibaatooyinka hufnaanta iyo isla xisaabtanka. Maamulka aan caddayn ee jawaabta iyo caddayn la'aanta cidda lagula xisaabtamayo halka, sida iyo cidda loo isticmaalo lacagaha ayaa wiiqaya kalsoonida nidaamyada. Labada waddanba, jawaabaha waxaa loo arkay inay ugu horrayn fal-celinayaan halkii ay ka ahaan lahaayeen kuwo hawlgal leh iyadoo diiradda la saarayo dhimista welwelka cuntada iyo biyaha ee degdegga ah ee gobollada juqraafiyeed ee ay saameeyeen. Barnaamijyada qaar ee Soomaaliya, beegsiga waa uu fiicnaaday waxayna ku salaysan tahay daahfurnaan, hab doorasho oo iskaashi ah.

Daneeyayaasha ayaa wali la tacaalaya sidii ay u fahmi lahaayeen tallaabada ku habboon in la saadaaliyo xiisadda. Tani way sii cakiran tahay marka dhibaatada haqab-beelka cuntada ay sababto shoog badan oo dadka qaarkiis ay wajahaan heerar qalalaase oo cunto yari ka hor inta aan la saadaalin. Hay'adaha gargaarka ee Kenya waxay dareemeen inay goor hore uga jawaabeen warbixinnada hay'adda maaraynta abaaraha ee heer qaran iyo saadaasha xilliyeedka, laakiin tallaabada la qaaday ayaa ahayd in la yareeyo saameynta abaarta ee sii kordhaysa. Waxaa jiray dhowr hindise oo lagu xoojinayo ilaalinta bulsheed ee ka jawaab celinta dhibatooyinka ee labada waddan waxayna kuwani awood weyn u leeyihiin TL. Si kastaba ha ahaatee, daneeyayaashu waxay dareemeen in tani ay ahayd mid "aad u yar, aad u daahday" marka la barbardhigo 2016-17, markii hore loo maleyay in ay ka hortagtay xaalad degdeg ah oo qoysas badan.

## Talooyinka muhiimka ah

U samee aragti TL xaalado kala duwan

Xog-bixiyeyaashu waxay sheegeen in TL ay ka dhigan tahay ka jawaabista goor hore iyadoo la filayo saamaynta mustaqbalka ee xiisadda laakiin ma cadda sida TL ula xidhiidho qaabka jawaabta joogtada ah oo ay ku jiraan dhimista khatarta musiibada, falcelinta hore, jawaabta hore iyo jawaabta dambe. Natiijo ahaan, waxaan ku dhibtoonnay inaan helno tusaalooyin cad oo TL ah oo ku jira nidaamka rasmiga ah, marka laga reebo tijaabada CERF.

Taas bedelkeeda, nidaamka bulshada ku salaysan ee aan rasmiga ahayn ee TL ayaa loo arkay inuu yahay mid la filan karo, in kasta oo ay la kulmeen caqabado badan. Mid ka mid ah caqabadaha ugu muhiimsan waa isku xirka u dhexeeya hababka dawliga ah iyo hababka gargaarka iyo hababka aan rasmiga ahayn ee bulshada ku salaysan iyo doorka jilayaasha maxaliga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn ee qaabaynta go'aan qaadashada. La'aantan aragti la wadaago oo ku saabsan

ujeedooyinka TL waa fursad la lumiyay si loo xaqiijiyo qiimaha buuxa, iyo rajada, isticmaalka hababka TL.

Hubanti la'aanta ku xeeran saddex arrimood ayaa ah xudunta dhibaatadan:

1. Sideen wax uga qaban karnaa digniinta ugu horayso -galdalloyinka talaabada hore? Inkastoo horumarro la taaban karo laga sameeyay saadaasha, saamileyda, gaar ahaan heer qaran iyo heer caalami, ayaa wali la halgamaya sidii ay u samayn lahaayeen falalka ku habboon iyo kuwa hore ee cabbirkii loo baahnaa iyo muddo dheer.
2. Waa maxay tillaabooyinka ugu habboon ee la qaadayo, si loo yareeyo saamaynta xun ee dhibaatada, goorma ayayna habboon tahay in tan la sameeyo? Intee bay le'eg tahay, marka loo eego darnaanta iyo baaxadda iyo nooca dhibaatada, waa in dhibaatada soo socota ay noqoto mid bilwoda TL? Waxaa jira jahawareer ku saabsan in TL ay tahay talaabadii ugu horeysay ee jawaab celin joogto ah oo ay ku xigto ficil hore, jawaab celin hore iyo jawaab celin. Aragti dhammaystiran ayaa ah in TL ay ka kooban tahay waxqabadyo hore loo eegayo si loo odoroso kor u kaca mustaqbalka ee sugnaanshaha cuntada iyo nafaqo-xumada, taas oo ka soo horjeeda saadaalinta hore ee xiisadda, waxayna dhici kartaa marxalad kasta oo dhibaato ah.
3. Halkee ayay TL ku habboon tahay nidaamyada gargaarka caalamiga ah iyo ka jawaabidda dhibaatooyinka iyo nidaamyada maxalliga ah? Jawaab bixiyaashu waxay ku kala duwanaayeen halka TL ay ku haboon tahay, xidhiidhka ka dhexeeya hawlgalada bini'aadantinimada iyo barnaamijyada horumarinta, iyo sida ugu wanaagsan ee loogu xidhidhiyo taageerada nidaamka iyo shabakadaha ku salaysan bulshada. Miyay ka badan tahay masuuliyad horumarineed, oo la mid ah dhimista khatarta masiibada? Ma qayb ka tahay dhisidda adkeysiga? Ma talaabo bini'aadantinimo, oo la mid ah jawaab-celinta hore? Mise waa qayb ka mid ah kuwan oo dhan? Aragtida meelaynta TL wali waa mid aan la qeexin laakiin tusaalayaal yaryar oo wanaagsan oo ah waxa shaqeeya ayaa soo baxaya.

Aragtida mustaqbalka ee TL waa in ay u aragto mid ka mid ah dhammaan qaybaha nidaamyada rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn. Hadda, waxaa jira u janjeera in xoogga la saaro heerka mashruuca tijaabada TL keligood taagan. Jawaabaha caqabadaha waaweyn ee TL waxaa la heli doonaa iyada oo la tixgelinayo TL oo ah muujinta dhammaan qorshaynta horumarinta iyo bini'aadantinimada, miisaaniyad-samaynta, iyo jawaabta, maaha qaab dhismeed kaligiis taagan.

Isku dhafka TL nidaamyada jira oo isticmaal qaab-dhismeedka xidhiidhka si loo qeexo aragtideeda mustaqbalka

Warbixintu waxay tilmaamaysaa baahida loo qabo in TL lagu dhex daro qaab-dhismeedka rasmiga ah ee dawladda, horumarinta, adkeysiga iyo barnaamijyada bini'aadantinimada iyo in la horumariyo xidhiidhyo wanaagsan oo lala yeesho iyo ka qaybgalka hababka aan rasmiga ahayn/bulshada ku salaysan iyo hababka la hoggaamiyo, sidaas awgeed laga fogaado abuurista qaabab cusub, maalgelin cusub iyo doodo cusub oo ku saabsan qiimaha iyo ujeedooyinka TL. Haysashada mabda'a TL si loo xoojiyo ka jawaab celinta dhibaatoyinka ee nidaamyadan oo dhan waxay sidoo kale u oggolaanaysaa TL dabacsanaan badan si ay uga jawaabto kuwa badan, iyo wax kasta, noocyada dhibaatooyinka soo socda isla waqti isku mid ah iyo inta badan marxaladaha qalalaasaha, ma aha oo kaliya bilawga dhibaatooyinka muuqda, sida

**Talooyinka muhiimka ah:**

1. In la sameeyo aragti iyo istaraatiijiyad midaysan oo ku aaddan ficilka la filayo ee xaaladaha kala duwan.
2. Is waafajinta ficilka filashooyinka iyo qaab-dhismeedyada iyo nidaamyada rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn ee bulshada ee jira.
3. in heer deegaan lagu daadajiyo ficilka la filan karo iyadoo la isku darayo hababka digniinta degdega ah ee nidaamyada bulshada iyo nidaamyada rasmiga ah iyo in si fiican la iskugu xidho iyo go'aan qaadashada heer deegaan iyo midka heer qaran/caalamiba.
4. Xoojinta digniinta degdega ah iyo falanqaynta saadaasha iyada oo la fududaynayo laguna jaangoynayo wax-qabadyada dardargaliya ficilada la filaayo, lana cadeeyo go'aamada heer qaran ee furaha u ah fududaynta hogaaminta iyo go'aan qaadashada heer deegaan, soo saarida xog cusub oo joogto ah iyada oo la adeegsanayo dabagal mudaysan iyo agabyo qiimayn, lana xoojiyo ku darida bulshooyinka ay saamayeen masiibooyinku

abaaro ama daadad ama ayax, iyo dhibaatooyin badan oo yaryar iyo kuwo dhexdhexaad ah.

Waxaa jira wax badan oo laga faa'iidi karo hubinta in wakiilada nidaamka aan rasmiga ahayn/bulshada ku saleysan ee TL lagu daro go'aan gaarista iyo hogaaminta nidaamyada rasmiga ah ee TL. Isgaarsiin laba-geesood ah oo badan ayaa kaa caawin doona nidaamyada rasmiga ah inay goor hore iyo si ka habboon uga jawaabaan waxayna ka caawin doontaa jilayaasha maxalliga ah inay si habboon uga jawaabaan oo ay beegsadaan qaar ka mid ah kuwa ugu nugul.

## Maxaliyeynta ficilka la filayo

**Isku-dubarid hababka digniinta ugu horayso ee nidaamyada aan rasmiga ahayn/bulsho ee nidaamyada rasmiga ah.** Gobol ahaan, waxaa jira dhawr tusaale oo nidaamyada saadaasha cimilada caadadu ay ku xidhaan hababka digniinta ugu horayso ee rasmiga ah. Casharradii laga bartay mashaariicdaas ayaa bar bilow u ah tallaabooyinka xiga ee meelaynta digniinta ugu horayso. Tallaabada ugu horreysa waxaa ka mid noqon kara xoojinta xiriirka laba-geesoodka ah ee ka dhexeeya hababka digniinta ugu horayso ee rasmiga ah iyo kan aan rasmiga ahayn si loo hagaajiyo waqtiga, beegsiga iyo noocyada go'aamada ficillada ee la isticmaalo.

**Isku xidhka ka sii wanagsan ee go'aan ka gaadhista maxaliga ah iyo qaranka/caalamigu ee ku saabsan fulinta wakhtiga ku haboon iyo doorashada talaabooyinka la filayo.** Khibrad, aqoon, karti, iyo wakaalad si ay u qaadato macnaha guud ee TL waxaa laga helay heer maxalli, heer qaran ilaa heer bulsho, iyo nidaamka aan rasmiga ahayn. Nidaamka caalamiga ah, inta badan, wuxuu ahaa mid ka go'ay go'aan qaadashada beesha maxalliga ah bilowgii jawaabta wuxuuna weli, ilaa xad, u shaqeeya si ka duwan jawaabaha bulshada ku salaysan. Go'aannada ku saabsan wakhtiga iyo nooca TL ee loo baahan yahay waa inay ka bilowdaan heer deegaan iyo heerar sare oo go'aan-qaadasho ah waa inay fududeeyaan go'aan gaarista heerka maxalliga ah, la qabsiga iyo barashada ku saabsan ka jawaabista si firfircooni leh ee kakan, is-kordhinta iyo saamaynta joogtada ah ee cimilada la xidhiidha. dhibaatooyinka haysta bulshooyinka iyo hab-nololeedkooda. Sida baaxadda, muddada iyo darnaanta baahida TL ay kordheyso, sidaas awgeed baahida agabka iyo awoodda TL way kordhi doontaa. Qorshaynta lama filaanka ah ee go'aan-gaadhayaasha maxalliga ah waxay fududayn kartaa kor u qaadista tartiib-tartiib ah ee taageerada jawaab-celinta maxalliga ah iyo, ugu dambeyntii, si wadajir ah oo rasmi ah iyo hirgelinta aan rasmi ahayn ee TL.

## Xooji digniinta ugu horayso iyo falanqaynta saadaalinta

**Fududeey iyo habayn waxyaabaha keenaya heerka qaran iyo kan caalamiga ah ee talabooyinka la filayo** iyo xidhiidhka ay la leeyihiin go'aan-gaadhayaasha si ay ugu oggolaadaan go'aannada "aan laga qoomamayn" goor hore iyo in la kordhiyo hoggaanka heerka beesha ee go'aan qaadashada.

**Caddayn go'aamada heer-qaran ee furaha u ah si loo fududeeyo hoggaaminta heer deegaan iyo go'aan ka gaarista ficilka la filayo.** Tusaale ahaan, cadee arrimaha mustaqbalka fog sida hababka lagu siidaayo lacagaha, qaadista ficilada u diyaarsanaanta si loo yareeyo jahawareerka mustaqbalka iyo samaynta habab lagu suurtageliyo macnaha guud, dabacsanaanta iyo la qabsiga go'aan qaadashada heer-hoosaad iyo heer deegaan.

**Soo saar warar dheeraad ah oo joogto ah oo ku saabsan haqab-beelka cuntada iyo saadaalinta natiijada nafaqeynta iyada oo loo marayo la socodka wakhtiga dhabta ah iyo qalabka.** Maaddaama darawallada qalalaasuhu iyo natiijooyinkoodu yihiin kuwo adag oo aad u firfircoon, falanqaynta wakhtiga dhabta ah ee xasaradaha cimilada ayaa loo

baahan yahay. Qalabka sida falanqaynta dhaqaalaha qoyska (HEA) ayaa si joogto ah u hagaajin kara go'aan ka gaarista haqab-beelka cuntada iyo dhaq-dhaqaaqa hab-nololeedyada iyo noocyada tallaabooyinka la qaadayo, gaar ahaan heer-hoosaadyo iyo heer deegaan. HEA waxay isku dari kartaa xogta wakhtiga-dhabta ah si ay u cusboonaysiiso haqab-beelka cuntada ee la saadaaliyay iyo natiijooyinka hab-nololeedyada oo ay u fududayso qaadista TL.

**Si aad ah u xooji ka mid noqoshada iyo ka-qaybgalka bulshooyinka ay saamaysay iyo shabakadaha maxalliga ah iyo bulshada** ee go'aan qaadashada ku saabsan wakhtiga, beegsiga iyo nooca tallaabooyinka la filayo in la qaado.

## Akhris dheeraad ah


Centre for Humanitarian Change. 2022. *Anticipatory action to mitigate drought-induced crises: Tracking drought impacts and aid responses in Kenya and Somalia, 2020-2022*. Edinburgh: Jameel Observatory, University of Edinburgh Global Academy on Agriculture and Food Systems and Save the Children. http://dx.doi.org/10.7488/era/2280

Farr, E., Finnegan, L., Grace, J., and Truscott, M. 2022. *Dangerous delay 2: The cost of inaction*. Edinburgh: Jameel Observatory, Oxfam and Save the Children. http://dx.doi.org/10.7488/era/2231

Hillier, D. and Dempsey, B. 2012. *A dangerous delay: The cost of late response to early warnings in the 2011 drought in East Africa*. London: Save the Children and Oxfam. http://hdl.handle.net/10546/203389



Jameel Observatory for Food Security Early Action waa iskaashi caalami ah oo ay hogaamiso Jaamacadda Edinburgh oo kaashanaysa Machadka Cilmi-baarista Xoolaha Caalamiga ah (ILRI), Save the Children, Abdul Latif Jameel Faqriga Action Lab (J-PAL) iyo Community Jameel.

Mac’ hadka ILRI ee Nairobi, Kenya ahaan, waxaan isku darnaa aqoonta maxalliga ah iyo welwelka bulshooyinka wajahaya khataraha gaajo ee hoose iyada oo lagu ladhayohal-abuurnimada sayniska xogta iyo waxqabadka bani'aadamnimada; waxa la isku kaashanayaa si looqorsheeyo xalal saadaalin kara,, loo diyaarin karo, loogana gudbi karo caqabadaha cimilada la xidhiidha ee saamaynaya haqab-beelka cuntada iyo nafaqa-darrada ee dhulka engegan.jameelobservatory.org / info@jameelobservatory.org



The University of Edinburgh is a charitable body, registered in Scotland, with registration number SC005336

This brief has a Creative Commons Attribution 4.0 International Licence, June 2022